



PPS: Wararkii ugu Dambeeyey ee Ku Saabsan Xanuunka Caabuqa Coronavirus

Gacaliye Waalidiinta PPS,

Shaqaalaha Dugsiyadayada Degmadu waxa ay sii wadaan sidii ay ula socon lahaayeen marba wixii ka soo kordha xanuunka coronavirus gobolka Oregon, Washington iyo guud ahaan wadanka oo dhan. Waxaan si joogta ah ula xidhiidhnaa qeybaha waxbarashada iyo hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee aan iskaashiga leenahay, iyo waliba sidoo kale waxaan xidhiidh maalinle ah la leenahay Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah iyo degsiyada degmooyinka ee aan dariska la nahay. Intaas waxaad dheer:

- Shaqaalahayaga dhinaca nadaafada iyo shaqaalaha hawlgalada waxa ay maalin walba si joogta u wadaan nadaafada, iyaga oo mudnaanta siinaya sidii fasalada gudahooda iyo meelaha la iskugu yimaado u noqon lahaayeen nadiif. Dadaalada nadaafada waxaa la raacaya nidaamyada ay u dejiyeen Degmada Multnomah iyo Xarunta Xakameynta Cudurada Faafa.
- Waxaa la sameeyey koox khabiiri ah oo leh shaqooyin kala gedisan basle isku hadafa ah, shaqaalahani waxa ay kulmaan maalin kasta sidii ay ugu sameyn lahaayeen dib u eegis, wada hadal iyo inay qaadaan tallaabooyin go'aanada la qaadanayo, iyo tallaabooyin lagu tixgalinayo su'aalo fara badan oo khuseeya xanuunka coronavirus haddii ay yihiin kuwa hadda jooga iyo wax dhici kara mustaqbalka.
- Waxa aan ka codsaneynaa maamulayaasha iskuulada in ay ku dhiirigaliyaan ardayda iyo shaqaalaha dadaalada lagaga hortagayo xanuunkani oo ay ka mid yihiin in si joogta gacmaha loo dhaqo, afka la daboolo marka la qufacayo ama hindhisayo, iyo in la isticmaalo waxyaabaha gacmaha lagu nadiifiyo.

Caafimaadka, nabadgelyada iyo fayyo-qabka ardaydeena iyo ka shaqaluhuba waa mudnaantayada koowaad. Adiga iyo ardaygaagu waxa aad naga caawin kartaan sidi lo yarayn lahaa khatarta uu ku faafayo xanuunkani coronavirus in aad guriga iska joogtaan haddii aad aragtaan in uu idin hayo calaamadaha lagu garto hargabka ama ifiladu.

Waxa aan ogsoonahay in waalidiintu hayaan su'aalo fara badan oo aan ahayn kuwa aan korka ku sheegnay. Waxa noo qorsheysan in aan waalidiinta la wadaagno marba wixii cusub ee soo kordha labo jeer todobaadkii mustaqbalka soo socda. Intaas wixii u dhexeeya fariimaha ka imanaya PPS waxaad kala socon kartaa idinka oo booqanaya lingyada hoose. Sidoo kale waxaad ka heli kartaa dhammaan fariimaha waalidiinta iyo agabyada kale idinka oo booqanaya halkan pps.net/coronavirus.

- [Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah](#)
- [Hay'ada Caafimaadka Oregon \(OHA\)](#)
- [Xarumaha Xakameynta Xanuunada Faafa](#)
- [Waaxda Waxbarashada Oregon \(ODE\) Xidhiidhka Tilmaamaha Xanuunada](#)

Waad mahadsan tihiin.

Waaxda Isgaarsiinta PPS